

KU HANUUNINTA BULSHADA

- ku socota qofka ku cusub Iswiidhan

Jihaynta bulshadu waa kooras ku saabsan bulshada Iswiidhishka ah, waxaana loogu talo galay dadka ku cusub wadanka Iswiidhan. Waxaa lagugu barayaa waxaad xaq u leedahay iyo wixii kaq la guugu leeyahay, ee khuseeya dimuqraadiyadda Iswiidhan iyo sida bulshada iswiidhishku u habaysan tahay. Kooraskani wuxuu ku siinayaa waxbixin muhiim ah – bilow fiican ayey kuu noqonayaa Iswiidhan!

Waxaad ka baranaysaa wax yaabo waaqica ah oo nolol maalmeedka ku saabsan, tusaale ahaan shaqada iyo waxbarashadda, guryaha, caafimaadka iyo daryeelka bukaanka iyo caruurta iyo qoyska. Kooraskani wuxuu ku baxayaa luqadaada afka-hooyo ama luqad kale oo aad garanayso. Waad dhagaysanaysaa, waydiinaysaa oo ka doodayaa. Waana bilaash!

Tusmada kooraska

Sideed mawduuc ayuu kooraska ku jira:

- In Iswiidhan la yimaado
- In Iswiidhan lagu noolaado
- In uu qofku masruufkiisa la soo baxo oo uu horumar ku sameeyo Iswiidhan
- Xuquuqda qofku uu leeyahay iyo waajibaadka saaran
- In uu qofku samaysto faamli oo uu caruur kula noolaado Iswiidhan
- In la saameeyo Iswiidhan
- In caafimaadka lagu daryeelo Iswiidhan
- In lagu gaboobo Iswiidhan

Qofkee ayaa kooraska dhigan kara?

Jihaynta bulshada waxaa loogu talo galay qofka ku cusub Iswiidhan oo haysta

- qorsheha meelaynta ama dejinta labada sannadood ee hore
- ama faamligiisii halkan uga soo horeeyey oo la soo qaaday

Wargelin

Waad isi soo wargelin kartaa adigoo annaga nala soo xiriiraya.

Telefoonka: 044-13 69 21

Imaylka: idris.moustafa@kristianstad.se

Bogga Internetka: www.kristianstad.se/vlc

Cinwaanka booqashada: VLC, vägledning och lärcentrum. Lasarettsboulevarden 2E

291 33 Kristianstad. tfn: 044-13 60 80

Soo dhawow oo nala soo xiriir annaga haddii aad wax su'aala qabto oo ku saabsan kooraskan.

Soo dhawow!



Kristianstads
kommun

Telefoonka:

Imaylka:

Warbixin! www.informationsverige.se waa bog internet ah oo loogu talo galay dadka ku cusub ee Iswiidhan yimi. Halkan waxaad ka akhrisan kartaa wax yaabo ku saabsan bulshada Iswiidhishka ah. Warbixinada oo dhami waxay ku qoran yihiin luqado kala duwan.

Bogga Internetka:
Cinwaanka booqashada: